




Xaashida Farsamada



4. WAXBARASHADAYDA DHEEMANKA AH

| Cinwaanka Hawsha | Waxbarashadayda dheemanka ah |
|--------------------|---|
| L2L cabbirada | <p>Is-wacyigelinta</p> <ul style="list-style-type: none"> - Maxaan samayn karaa? - Maxaan u baahanahay si aan u roonaado? <p>Hindisaha & Lahaanshaha</p> <ul style="list-style-type: none"> - Fahamka xadidnaanta waxbarashada & suurto galnimada - Xil iska saarista mas'uuliyada waxbarashadayda - Baadhista su'aalaha hagida iyo qiyaasaha <p>Hawlgelinta & Maamulista</p> <ul style="list-style-type: none"> - Fahamka xeeladaha waxbarashadayda iyo sida ay u saameeyaan waxbarashadayda - Dooro & raadi khayraadka aan heli karo <p>Kormeerka & La qabsiga</p> <ul style="list-style-type: none"> - Sidee buu qaabkaygu u bedelay wixii aan sameeyay? - La qabsiga waxa aan qabto ee waxbarashadayda mustaqbalka |
| Soo koobida hawsha | Faham xiriirka ka dhexeeya fikradaha iyo dhaqanka, si aad u fahamto marka fikradahaagu ay kaa fogeynayaan waxbarashada. Hawshani waxay kaa caawinaysaa inaad aqoonsato oo aad caddayso isdhexgalka fikradahaaga iyo |






| | |
|--|--|
| | ficiladaada, iyo sidoo kale falanqaynta dareenka iyo shucuurta saamaynta ku leh hab-dhaqankaaga. |
|--|--|

Qalab hawleed

Baro sida waayo-aragnimada taban loogu beddelo kuwa togan, iyo sida looga koro kuwa togan! Faham xiriirka ka dhexeeya fikradaha iyo dhaqanka, si aad u fahamto marka fikradahaagu ay kaa fogeynayaan waxbarashada. Hawshani waxay kaa caawinaysaa inaad aqoonsato oo aad caddayso isdhexgalka fikradahaaga iyo ficiladaada, iyo sidoo kale falanqaynta dareenka iyo shucuurta saameeya hab-dhaqankaaga waxbarasho. Waxaad daabacan kartaa xaashida waxqabadka ama waxaad ku sawiri kartaa jaantus la mid ah qayb kamid ah warqad/buug xusuus qor

Xaalada Waxbarasho: (togan ama taban)





Mida togan:

Ka fikir xaalad aad ku soo martay khibrad waxbarasho oo guul leh. ugu qor magaca xaaladdan waxbarasho si cinwaan ahaan warqadaada gaarka ah.

Haddaba raac tallaabooyinkan:

1. Buuxi dheemanka (mawduucyada togan/tabani)
 - Waa maxay heerka waxbarashadu? (tusaale cashar falal aan caadi ahayn)
 - Maxaa maskaxdaada ku jira? (fikrado)
 - Sidee ayaad ku dareentay? (dareen/dareen)
 - Maxay ahayd falcelintaada jireed? (dareen)
 - Sideen kugula dhaqmay? (dabeecad)

Ku soo celi hawshan inta ugu badan ee suurtoogalka ah. Isku day inaad haysato ugu yaraan 3 ama 4 tusaale oo aad ku shaqeyso. Markaad tan sameyso, baro jaantusyada, oo hel ereyada qeexaya dhammaan fikradahaaga togan ee adiga iyo waxbarashadaada.

Ku qor warqad.

yacnii. Runtii aad ayaan ugu riyaaqay barashada markaan la hadlayo dadka kale. Waxaan jeclahay in aan weydiyo su'aalo oo aan ogaado. Waxaan jeclahay in aan





Dhaqhaqaaqa Istiraatiijiyada Hagidda ee UPSIM

dhegeysto dadka kale marka ay hadlaan, oo aan ku celiyo ama qoro oo aan helo jawaab celin toos ah oo ku saabsan ku dhawaaqidayda.

Hadda isticmaal fikradahan togan si aad u qeexdo waxa aad aaminsantahay. Sideed isu aragtaa inaad tahay qof wax baranaya?

yacnii. Waxaan ku fiicanahay ku dhawaaqida. Waxaan ku fiicanahay inaan xiriir la sameeyo dad cusub. Wax walba waan gaari karaa haddii aan horay u sii qorsheeyo oo aan go'aansado. Waxaan dadka waydiisan karaa caawimaad markaan u baahdo. Ma fududa inaad khabiiir noqon bilawgii hore, habka waxbarashadu waa mid xiiso leh oo dhib badan.

Mida taban:

Hadda ku buuxi dheemanka adigoo isticmaalaya tusaalooyin kiis waxbarasho oo taban. Ka fikir xaalad aad la kulantay guuldarro ama aadan gaarin wixii aad rabtay.

- Siduu ahaa xaalku? (yacnii. Waxaan kusoo bandhigay fasalka hortiisa waxaana i saxay macalinka)
- Maxaa maskaxdaada ku wareegayay? (fikrado)
- Sideed ku dareentay? (dareenno/dareenno)
- Maxay ahayd jawaabtaada dareenka jireed? (jireed)
- Sidee ayay kugu kaliftay in aad u dhqanto? (dhaqan)

Markaad buuxisay dheemanka dhowr jeer xaalado waxbarasho oo taban oo kala duwan, qor dhammaan fikradahaaga xun ee adiga iyo waxbarashadaada ku saabsan:

yacnii. Runtii waan necbahay xifdinta xeerarka naxwaha. Ma jecli inaan dareemo nacasnimo. Naxwaha waa caajis. Suurtagal maaha in diirada saaro marka aan sidoo kale raadinayo helida wakhti aan ku daryeesho caruurteyda / kasoo qaadida xanaanada iwm. Runtii aad ayaan u daalanahay shaqada kadib, waxa ugu dambeeya ee aan rabo waa in aan wax barto.

Hadda isticmaal fikradahan xun si aad u qeexdo waxa ugu muhiimsan ee aad ka aaminsan tahay naftaada.

yacnii. Waan ku xumahay xifdinta xeerarka. Waxaan ku xumahay habaynta erayada iyo aragtida qaabdhismeedka. Haddii aan ka takhalusi waayo lahjadayda, si fiican uma hadli karo. Aad baan u da' weynahay inaan luuqad cusub barto.

Sida aan u aragno xaalad la bixiyay ayaa go'aamisa sida aan dareemeyno. Haddii aan bedelno habka aan u fikirno, dareenku sidoo kale wuu isbedeli doonaa. Sida aynu u fikirno ayaa go'aamisa hab-dhaqankeena. Haddii aad bedesho habka aad u fakarayso, waxaad bedeli kartaa hab-dhaqankaaga. Mararka qaarkood waxaynu buunbuuninnaa muhiimadda ay leedahay xaalad keeni karta cawaaqib xumo oo naga hor istaagta inaan ku dhaqanno.





Dhaqhaqaaqa Istiraatiijiyada Hagidda ee UPSIM

1. Ka hor tagida fikradahayga xun
 - IMA jiraan caddayn lid ku ah fikradahayga? Tusaale bixi
 - Haddii aan weydiiyo saaxiib ama dadka kale ee i yaqaan, miyay igu raacsan yihiin fikradahayga iyo waxa aan aaminsanahay?
 - Maxaa talo ah oo aan siin lahaa dadka kale ee xaaladan oo kale kujira?
 - Tani muhiim ma noqon kartaa sanad kadib?
 - Maxaad u malaynaysaa hadda markaad ka jawaabtay mid ama in ka badan oo ka mid ah su'aalahaan?
 - Sidee ayay dareentaa in aad sidan ka duwan u fikirto iyo sidee ayay tani kuu tamar galinaysaa?
2. Iyada oo ku saleysan dheemanka xaaladaha waxbarasho ee togan, u fiirso cawaaqibta ku saleysan muuqaalka aad ku soo bandhigtay dheemanka.

Buuxi shaxda hoose adoo ka duulaya mid ka mid ah dhacdooyinka togan ee aad tilmaantay, maxay ahaayeen cawaaqibta adiga iyo agagaarkaaga kuu keenay iyo fikrado nooc ee ah ayaa laga soo qaadan karaa tan?

| | |
|---|--|
| Xaalad waxbarasho oo togan | |
| cawaaqibka; maxaa ka dhashay, adiga ama agagaarkaaga? | |
| Rumaynta asaasiga ah; maxaan naftayda u sheegaa si aan maskaxdayda togan u ilaashado, oo aan nafteyda u dhiirigeliyo marka aan halgamayo? | |

